CHILD OUTCOME SUMMARY (SOOKOOBISTA NATIIJADA ILMAHA, COS)
DIYAARINTA WARAAQDA QOYSKA
EARLY SUPPORT FOR INFANTS AND TODDLERS (CAAWIMADA HORE EE CARUURTA YAR-YAR IYO SOCOD BARADKA, ESIT)

## Koriinka Shaqaynaya ee Ilmahaaga

Adiga iyo kooxdaada bixiyayaasha ayaa go'aamin doona sida ilmahaagu uga qaybqaato hawlaha caadiga ah ee qoyska iyo hawlaha hab shaqaynaya. Tusaale ahaan, ilmahaaga waxaa laga yaabaa inuu isticmaalo dhowr kelmadood laakiin wuxuu leeyahay habab kale oo wax ku ool ah oo uu kugula xidhiidho, sida luqadda dhegoolaha, dhawaaqyada, in uu gacantaada qabsado ama uu kuu tilmaamo.

Adiga iyo kooxdaadu waxaad isticmaali doontaa macluumaadka aad ka heshay khabiirka. Waxa kale oo aad tixgelin doontaa indho-indheynta xirfadlayaasha iyo daryeelaha kale, qalabka qiimaynta iyo wax ka badan. Si ay caruurtu u noqdaan kuwa guulaysta marka ay joogaan guriga, bulshada dhexdooda iyo goobaha sida goobaha daryeelka ilmaha ama dugsiga barbaarinta, waxay u baahan yihiin inay lahaadaan xirfado xoogan oo saddex dhinac ah:

1. Xidhiidh wanaagsan oo ay bulshada la yeeshaan
2. Helitaanka iyo isticmaalista xirfado cusub
3. Qaadista tallaabada si ay u buuxiyaan baahiyahooda

### Waa Maxay Xirfadaha Shaqaynaya?

Halkii aan si fudud u ogaan lahayn xirfadaha ilmahaagu leeyahay, waxaan rabnaa inaan ogaano sida ay u isticmaalayaan maalinta oo dhan si ay u fuliyaan waxyaabo iyaga macno u leh. Tusaale ahaan, waxaa muhiim ah in la ogaado inta kelmadood ee ilmahaagu odhan karo laakiin waxaa aad u macno badan in la ogaado sida ilmuhu u isticmaalo erayada si uu kuugu sheego inay rabaan cunto ama si uu u magacaabo sawirada buuga kujira.

### Waa Maxay Geedka Go'aanku?

Geedka Go'aanka ayaa adiga iyo kooxdaada kaa caawin doona inaad doorataan hadal si fiican u qeexaya sida ilmahaagu wax u qabanayo saddexda qaybood ee kor ku xusan marka loo eego carruurta kale ee da'dooda ah. Waxaan u isticmaali doonaa macluumaadkan si aan u go'aansano adeegyada dabooli doona baahiyahaaga oo aan kuugu abuurno qorshe adiga iyo ilmahaaga.

### Waxyaabaha ay tahay inaad maskaxda ku hayso markaad isticmaalayso Geedka Go'aanka

- Ka fakar sida ilmuhu u isticmaalo xirfadaha shaqada si uu uga qayb qaato hawl maalmeedka meelo kala duwan iyo dad kala duwan.
- Bayaanka ay kooxdu dooratay waa inuu ka tarjumayaa shaqada ilmahaaga oo ku salaysan:
    - Waxa laga filayo ilmahaaga si uu u gaadho meel gaar ah. Isticmaal waxyaabaha laga filayo dhaqanka gurigaaga si aad u go'aansato haddii ilmahaagu u shaqaynayo oo uu yahay heerka laga filayo da'dooda guriga.
    - Isticmaalkooda tiknoolajiyada/laqabsiga (qalabka maqalka, muraayadaha, qalabka dhaqdhaqaaqa, iwm.) marka ay caadi ahaan lahelikaro. Shaqadooda dhabta ah ee goobaha oo dhan, oo aan ku shaqaynayn duruufaha ku habboon haddii isaga/iyada ay haystaan tiknoolajiyada.
    - Da'da taariikhiga ah ee ilmahaaga, xitaa haddii ay ku dhasheen xilli kahoreeyay muddada dhalashadooda.



CHILD OUTCOME SUMMARY (SOOKOOBISTA NATIIJADA ILMAHA, COS)
DIYAARINTA WARAAQDA QOYSKA
EARLY SUPPORT FOR INFANTS AND TODDLERS (CAAWIMADA HORE EE CARUURTA YAR-YAR IYO SOCOD BARADKA, ESIT)

## Waraaqda Qoyska: Hubinta Koritaanka Ilmahayga

### Warqadani waxay kaa caawin doontaa inaad ka kafarto awooda ilmahaaga iyo fursadaha koriinka.

Ku buuxi meelaha hoose waxyaalihii aad ku aragteen in ilmahaagu ka sameeyo saddexdan qaybood ee horumarka. Tixgeli xirfadaha ilmahaagu hadda leeyahay *iyo* xirfadaha aad dareemayso inay muhiim u yihiin ilmahaagu inuu barto. Waa muhiim in waxa aad ka *ogtahay* oo aad ka aaminsantahay ilmahaaga lagu daro qiimaynta iyo dooda kooxda IFSP.

| | Sidee ilmahaygu… | Awoodaha ilmahaygu waa… | Fursadaha koritaanka waa… |
|---|---|---|---|
| 1: Xidhiidh wanaagsan oo ay bulshada la yeeshaan | • La xidhiidh kuwa kale<br>• Muuji dareemada<br>• Ka jawaab taabashada<br>• Xiisaynaya in uu hawl laqabto qofkale<br>• Tagaya hawsha ku xigta<br>• U dhaqmaya markay rabaan in lasiiyo soojeed badan<br>• Faham waxyaabaha joogtada ah iyo waxyaabaha lafilayo<br>• Jawaab iyo jawaab celin<br>• Maaraynta iskubuuqa | | |
| 2: Helitaanka iyo Isticmaalka Xirfado Cusub | • Isticmaal erayada goobaha maalinlaha ah<br>• Xalliyaan dhibaatada (u gudub shay aanay gaadhi karin)<br>• Faham iyo/ama ka jawaab tilmaamaha iyo codsiyada<br>• Ku dayo kuwa kale<br>• Su'aalaha ka jawaab<br>• Isticmaal buugaag, sawiro, walxo | | |
| 3 Qaadashada Tallaabo ay ku daboolayaan baahiyahooda | • Kataxadirista aasaasiga ah<br>• Ogaysii waxay rabaan iyo waxay u baahan yihiin<br>• U muuji wacyigalinta halista<br>• Ka dhaqaaji jidhkooda adoo meel ka kaxaynaya una kaxaynaya meel kale<br>• Isticmaal gacmahooda si ay ugu ciyaaraan boolbarada | | |
| Su'aalo Dheeriya si Lootixgaliyo | | • Waa maxay waxqabadyada ama dadka uu ilmahaygu ka helo?<br>• Sidee ilmahaygu ii ogeysiiyaa waxay jecel yihiin?<br>• Goorma ayuu ilmahaygu yahay kan ugu wadashaqaynta badan?<br>• Maxaa dajiya ilmahayga? | • Waa maxay waxqabadyada ama dadka aanu ilmahaygu jeclayn?<br>• Sidee ilmahaygu ii ogeysiiyaa wuxuu neceb yahay?<br>• Maxaa ilmahayga baqogaliya?<br>• Maxaa ilmahayga niyad jabiya? |